

Norway oo ku biirtay nidaamka shahaadada koroonaha ee Midowga Yurub (EU)

Khamiista 24-ka juun ayay Norway ku biiraysaa nidaamka shahaadada koroonaha ee EU. Dadka qaatay tallaalka buuxa ama uu cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay oo markaana haysta shahaado koroono oo shaqaynaysa waa loo oggol yahay in ay Norway soo galaan. Waxaa dadkaas laga dhaafayaa karantiilka, tijaabada iyo is-diiwaangelinta soo gelidda waddanka. Waddammada reer Yurub ee ku jira nidaamka EU laga billaabo 1-da luuliyo xudduudahooda ayay ku xaqiijin karaan shahaadada koroonaha ee norwiiijiga.

- Wadashaqayn wanaagsan, waxtar ah oo wakhti gaaban qaadatay oo dhexmartay waddammada Yurub ayaa keentay in aan durba khamiista helayno shahaado koroono taas oo safarka aad ugu fududayn doonta dadka tallaalka buuxa qaatay ama uu cudurka koroonuhu ku dhacay. Taas oo wax badan u taraysa qofka safraya iyo goobaha shaqada ee muhiimka ah ee dalxiiska Norway, ayuu yiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Bent Høie.

Isticmaalka shahaadada koroonaha ee xudduudka Norway

Dadka tallaalka buuxa qaatay ama cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay oo taas ku caddayn kara shahaado koroono oo la xaqiijiyay kuna xiran nidaamka EU, si xor ah ayay Norway u soo geli karaan waddankii ay doonaan ha ka soo safreene. Dadkaas waxaa laga dhaafayaa karantiilka, tijaabada inta aysan waddanka imaan ka hor, tijaabada xudduudda lagu qaado iyo in ay is-diiwaangeliyaan marka ay waddanka soo gelayaan.

Laga billaabo 24-ka juun Norway waxay xaqiijin kartaa shahaadooyinka koroonaha ee waddammada kale ee EU/EØS, haddii ay waddammadaasi ku biireen nidaamka EU. Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan waddammada bixiya shahaadada koroonaha ee EU ka akhriso [Re-open EU \(europa.eu\)](https://europa.eu) iyo bogga internetka ee shahaadada koroonaha ee [EU](https://europa.eu).

Isticmaalka shahaadada koroonaha ee waddammada kale

Shahaadooyinka koroonaha ee EU waxay dhaqangelayaan 1-da luuliyo. Markaas oo ay waddammada EU-/EØS intooda badan ku xirnaan doonaan nidaamka EU oo ay suurtaggal u ahaan doonto in ay xudduudahooda ku xaqiijiyaan shahaadada koroonaha ee Norway. Waxaa kuwaas ka mid ah waddamada Isbayn, Talyaaniga, Giriigga iyo Korowaashiya.

- Dadka safraya ayaga ayaa laga doonayaa in ay u kuurgalaan xeerarka karantiilka, kuwa tijaabada iyo kuwa ka hortagga faafidda cudurka ee ka jira waddanka ay u safrayaan. Xeerar kala duwan ayay waddamadu leeyihiin, ayuu yiri Høie.

Xeerarka ka jira waddammada kala duwan ee EU/EØS halkaan ka eeg reopen.europa.eu.

24-ka bisha juun waxaa is beddelaya muuqaalka shahaadada koroona dhinaceeda xuduudda la dhiibto oo wuxuu yeelanayaa calaamadda EU/EØS.

[Shahaadada koroona waxaad ka heli kartaa helsenorge.no](https://shahaadada.koroona.waxaad.ka.heli.kartaa.helsenorge.no).

Dadka aan isticmaali karin qalabka dhigitaalka ah

- Xal ayaan hadda u diyaarinnay dadka aan isticmaali karin kombiyuutar, moobil ama kombiyuutarka gacanta. Laga billaabo berrito waxay wici karaan teleefanka warbixinta koroona kaddib na shahaadada koroona ayaa boostada loogu soo dirayaa. Si kastaba, waxaan jecel nahay in ay dadka badankoodu isticmaalaan nidaamka dhigitaalka ah ee ku jira helsenorge.no, oo haddii loo baahdana shahaadada oo warqad ah guriga lagu daabacdo, ayuu yiri Høie.

Marka la woco teleefanka warbixinta/Helfo, waa in la sheegaa lambarka dhalashada - shahaadada koroona waxaa lagu dirayaa ciwaanka looga jiro diiwaanka dadweynaha. Haddii aad dibedda deggan tahay oo aad leedahay lambar dhalasho ama lambar-d oo norwiji ah, laakiin aadan lahayn bankID ama wax kale oo aqoonsigaaga xaqiijinaya oo aad ku geli karto helsenorge.no, markaas waxaad isticmaali kartaa nidaamka kor ku sharraxan ee loogu tala galay dadka aan isticmaali karin qalabka dhigitaalka ah. Si aad nidaamkan u isticmaasho waa in ciwaankaaga dibeddu uu ku jiraa Diiwaanka dadweynaha.

Haddii aad leedahay shahaado koroone oo shaqaynaysa boostada ayaa laguugu soo dirayaa. Ogow in ay hal toddobaad qaadan karto inta shahaadadu kuu imaanayso, taas oo ku xiran degdegta boostada. Ogow in shahaadadu shaqaynayso 90 maalmood oo ka billowda taariikhda la daabaco.

Wac teleefanka warbixinta koroona:

Isniin-jimce: 08.00 – 15.30

Haddii Norway la joogo: 815 55 015

Haddii dibedda la joogo: +47 21 89 80 42

Meelaha soo socda ayaa hadda shahaadada koroona loo isticmaali karaa:

- Si loo caddeeyo tallaalka, cudurka oo kugu dhacay ama tijaabo la qaaday oo cudurka lagaa waayay marka aad u safrayso dalalka ku jira nidaamka EU.
- Si lagaaga dhaafo karantiil, tijaabada ka hor intaan dalka la soo gelin iyo is-diiwaangelinta soo gelidda dalka marka aad Norway soo gelayso (Shardi: Waa in

aad tallaal buuxa qaadatay ama covid-19 kugu dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay).

- Ka-qaybqaadashada qabanqaabooyinka waaweyn.
- Raacidda doomaha dalxiiska xeebaha ee laysku xiro shahaadada koroonaha (Shardi: Waa in aad difaacan tahay. Waxaad difaacan tahay marka aad tallaal buuxa qaadatay, hal cirbad oo tallaal ah qaadatay saddex ilaa 15 toddobaad hortood ama covid-19 kugu dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay).